

Maarso 19, 2020

Qoysaska qaaliga ah ee JCPS,

Waan ognahay inay kuu ahayd toddobaadyo la yaab leh oo aan caadi ahayn, carruurtaada iyo qoyska intiisa kale ee JCPS. Waxaan ballan qaadnay inaanu kugu soo wargelin doonno waxa dhacaayo inta ay dugsiyada JCPS xiran yihiin dhammaanteenna aan wax ka qabanno cudurka faafa ee COVID-19. Waa tan waxi ugu dambeeyay:

- Guddiga Waxbarashada ee Degmada Jefferson waxay qabteen kulan khaas ah habeenkii Khamiista. [Halkan](#) ayaad ka daawan kartaa ku-celinta kulanka. Shayga ugu weyn ee ajandaha waa ansixinta qorshaha Waxbarista Dhaqanka Aan-Dhaqanka aheyn (NTI). **Haddii** JCPS oggolaato oo doorato inay shaqeyso qorshaheeda NTI, cunugaada wuxuu ka qeyb qaadan doonaa barashada fogaanta ee internetka. Waxaad heli doontaa tiro isgaarsiin ah labada toddobaad ee soo socda oo sharraxaya sida ay taasi u shaqeyso.
- Inbadan oo idinka mid ah ayaa codsaday caawinaad sidii aad ugu heli lahayd boorsada 'Digital Backpack' ee cunuggaaga kombuyuutarrada gurigaaga ama taleefannada gacanta. Halkan waxaa [ah muuqaal](#) muujinaya sida. Waxaad ubaahan doontaa inaad u isticmaasho Google Chrome biraawsar. Haddii aad wali dhibaato ku qabtid hagaajinta, waxaad la [xiriiri](#) kartaa khabiirka JCPS IT si aad u hesho caawimaad.
- Gudiyada Xulashada JCPS ee leh siyaado, nashaadaadyo waxbarid ikhtiyaari ah iyo leylisyo heer fasal kasta ayaa laga heli karaa [halkaan](#). Waxaan u jeednaa oo aan maqalnaa sheekooyin badan oo wanaagsan oo ku saabsan sida adiga iyo carruurtaada aad u isticmaaleysaan kuwaan si aan usii wadno barashada maalin walba.
- Goobaheena cunto qaybinta Degdega ah waxay ahaayeen guulo aad u weyn. Waxaan u qeybineynaa inka badan 12,000 oo quraac bilaash ah iyo qado qado carruurta 18 iyo ka yar, wax su'aalo ah laisma weydiyo, maalin walba maalmaha shaqada 10 subaxnimo - 1 galabnimo. Halkan waxaa ah liisaska [58 goobood oo lagu qaybiyo](#) iyo [khariidad](#) bogagga shabakadda oo dhan Jefferson County.
- La-taliyayaasha JCPS waxay la yimaadeen [talooyin dhowr ah](#) oo ka caawinaya qoysaska sidii ay ula tacaali lahaayeen walwalka ku saabsan la qaboojinta guriga inta badan maalinta.
- Dhamaan dhismayaasha JCPS oo ay kujirto Dhismaha Waxbarashada VanHoose iyo Dhismaha Lam waa u xiran yihiin dadweynaha. Tani waxay saameyn ku yeelan doontaa waalidiinta iyo mas'uuliyiinta isku dayaya inay diiwaan geliyaan carruurtooda shaqsi ahaan. Waxaad iska diiwaan gelin kartaa khadka tooska ah [halkan](#). Su'aalo? Wac 313-HELP laga bilaabo 7:30 subaxnimo illaa 5 galabnimo Isniinta-Jimcaha.

Waan kula socodsiin doonaa wixii soo kordha sida ay u dhacaan xilligaan aan caadiga ahayn. Waad ku mahadsantahay inaad ku aamintay cunugaaga macallimiinta dadaalka badan, maamulayaasha iyo shaqaalaha JCPS.